Habeen & Maalin ❄

Xaaqidda Degdegga Barafka

Saint Paul waxay ku dhawaaqdaa Degdegga Barafka kaddib marka barafka soo dhaco uu caadi ahaan gaaro 3” ama ka badan AMA marka uu isbiirsado ilaa 3” muddo dhowr maalin. Dhamaan jidadka waxaa lagu tilmaamaa Waddooyinka Habeenkii la Xaaqo ama Waddooyinka Maalinimadii la Xaaqo. Waddooyinka Habeenkii la Xaaqo waxay leeyahiin calaamadaha xaaqidda gaduudan ama cad sida calaamadaha hoose. Waddooyinka Maalintii la Xaaqo ma laha calaamadaha xaaqidda.

Xaaqidda Habeenkiii

Goorma: Waxaa la bilaabaa 9:00ka habeenka lagu dhawaaqo Degdegga Barafka wuxuuna socon doonaa ilaa subaxnimada ilaa jidka laga xaaqo ilaa garabka

Xagee: Jidadka lagu badan yahay—ee lagu calameeyay calaamadaha WADDADA HABEENKII LA XAAQO **lagu daray** hal dhinaca jidadka waqooyi-koofur ee la daggan yahay waxaana lagu tilmaamaa calaamadaha WADDADA HEBEENKII LA XAAQO DHANKAAN WADDADA.

Xaaqidda Maalintii

Waddooyinka Maalintii la Xaaqo **ma** laha calaamad

Goorma: Waxaa la bilaabaa kaddib marka la xaaqo Waddooyinka Habeenkii ilaa garabka, caadi ahaan 8:00da subaxnimo maalinta xigta.

Xagee: Jidadka la daggan yahay ee bari-galbeed lagu daray hal dhinaca jidadka la daggan yahay waqooyi-koofur – dhinaca AAN LAHAYN calaamadaha xaaqidda habeenkii.

Xasuusin: Waxaa jira waxyaabo ka reeban sharciyadaan. Si wanaagsan ayaa loo calameeyay waxyaabaha ka reeban.

Dhigashada baabuurta waa mamnuuc ilaa dhamaan barafka laga xaaqo jidadkaan ilaa garabka.

Iska Ilaali in lagu siiyo Tigidh iyo in lagaa Jiito Baabuurka!
Magaalada waxay saarta tigidh waxayna jiidaa baabuurta ka hor inta aan la bilaabin xaaqidda. **Ganaaxa “tigidhka barafka” waa $53.** Jiididda waxay keeni kartaa in laguugu dallaco kharash badan oo lagu bixiyo jiididda iyo meesha baabuurka la dhigo.

Si aad u ogaatid haddii uu jiro degdegga barafka, dhageyso raadiyaha, fiiri wararka TVga iyo akhri wargeysyada – ama wac tel. **651-266-PLOW (651-266-7569)** waa khadka laga helo wararka xaaqidda barafka 24 saac. Wararka xaaqidda barafka waxaa kaloo laga heli karaa bogga internetka Magaalada **www.stpaul.gov** . **Isku qor ogeysiiska emailka ama qoraalka ee lagu magacaabo SnowAlert, kaasoo laga helo www.stpaul.gov.snowalert. Ama nagala soco Twitter – www.twitter.com/stpaulpublicw.**

SAINT PAUL
The Most Livable City in America

Saint Paul’s snow plowing...
Now it’s as simple as
Night & Day
Call 266-PLOW

Responsive Services • Employee Pride • Quality Facilities
SAINT PAUL PUBLIC WORKS